

Oggolaanshaha Adeegyada

Oggolaanshahani wuxuu khuseeyaa dhammaan barnaamijyada People Incorporated, goobaha iyo bixiyeyaasha halkaas oo aniga (ama ilmahaygu) daryeel ku heli karo hadda ama mustaqbalka.

Oggolaanshaha Daaweynta:

Waan fahamsanahay in aniga (ama ilmahaygu) qabo xaalad u baahan baadhitaan iyo daaweyn. Waxaan fursad u heli doonaa inaan kala hadlo shaqaalaha People Incorporated ee la shaqeeya aniga (ama ilmahayga) daaweynta People Incorporated iyo shaqaalahoodu ay rumeysan yihiin in loo baahan yahay. Si loo bixiyo daryeelkan, People Incorporated iyo shaqaalaheeda waxay aruurin karaan macluumaadka ku saabsan caafimaadkeyga aniga (ama ilmahayga), oo ay ku jiraan macluumaadka sida taariikhda caafimaadka qoyska. People Incorporated ama shaqaalaheeda midkoodna ma ballan qaadi karo natiijooyin gaar ah oo ku saleysan daaweynta la soo jeediyey, laakiin People Incorporated iyo shaqaalaheeda ayaa ka jawaabi doona su'aalaha ku saabsan daaweynta. Waan diidi karaa daaweyn kasta oo la igula taliyay anigoo taas la socodsiiinaya shaqaalaha aan la shaqeynayo (ama kuwa la shaqeynaya ilmahayga) waqti kasta.

Meeleynta Manfacyada Caymiska iyo Lacag-bixinta Siidaynta Macluumaadka:

People Incorporated ayaa laga yaabaa inay biil u dirto caymiskega aniguna waxaan oggolahay lacag-bixin caymiskega in la siiyo People Incorporated wixii adeegyo ah ee aniga (ama cunugeyga) la i siiyo.

Waxaan oggolahay oo aan u oggolaaday People Incorporated inay sii daayaan macluumaadka aniga igu saabsan, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn oo kaliya dukumintiyada adeegga caafimaadka dhimirka, qoraalada horumarka, oggolaanshaha ama bixitaanka, iyo xaaladda deganaanshaha, bixiyaha caymiska ama hay'ad kale oo bixinaysa adeegyada People Incorporated ay siiso aniga (ama ilmahayga). U fasaxidda iyo oggolaanshaha People Incorporated si ay u siidaayaan macluumaadkan, waan fahamsanahay oo aan oggolahay in macluumaadkan loo sii dayn karo Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota, Prepaid Medical Assistance Program Managed Care Organizations, hay'adaha adeegyada bulshada ee gobolka, Medicare, hay'adaha caymiska caafimaadka ganacsiga, ama hay'ado kale oo la mid ah ama la xiriira.

Intaa waxaa sii dheer, waxaan People Incorporated u fasaxayaa inay racfaan ka qaataan diidmo kasta oo sheegasho kasta oo adeegyo ah oo ay aniga (ama ilmahaygu) i siisay People Incorporated ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota ama hay'ad kale oo kormeera sharciga ku habboon.

Mas'uuliyadda Lacag bixinta iyo Gargaarka Maaliyadeed:

Waan fahamsanahay in inta People Incorporated ay sameyn doonto dhammaan iskudayada ay ku dallaceyso caymiskega adeegyada aniga (ama cunugeyga) la siiyo, waxaan ugu dambeyntii waxaan anigu mas'uul ka ahay bixinta dhammaan khidmadaha adeegyada ay bixiso People Incorporated - oo ay ku jiraan wixii lacag-bixinno ah, wixii laga jaro, caymiska, kharash-bixinta ama wixii adeegyo ah ee aan hoos imanin qorshahayga caafimaad. Waxaan fahamsanahay in helidda adeegyada People Incorporated mustaqbalka la joojin karo sababta ay tahay bixin la'aanta qarashyadan.

Haddii aanan lahayn awood aan ku bixiyo kharashyadan, waxaan ogeysiin karaa shaqaalaha People Incorporated wakhti kasta, waxayna iga caawin doonaan aqoonsiga ikhtiyaarrada aniga (ama ilmahayga) u oggolaan kara inaan sii wado helitaanka adeegyada, oo ay ku jiri karaan hal ama dhowr nooc oo ah kaalmada maaliyadeed iyadoo kuxiran xaaladdayda hadda jirta.

Walaacyada iyo Ka noqoshada:

Haddii aan su'aalo ka qabo ama walaac ka qabo ogolaanshahan, waxaan kala hadli karaa xubinta shaqaalaha People Incorporated ee foomkan i siisay. Oggolaanshaha aan ku bixinayo foomkan ma aha mid dhacayo taariikh cayiman, wuuna sii socon doonaa weligiis, illaa aan ka noqdo iyaga anigoo u soo gudbinaya codsi qoraal ah:

People Incorporated
Attn: Legal and Compliance
3000 Ames Crossing Road, Suite 600
Eagan, MN 55121

Hasayeeshee, ficil kasta oo horey loo qaaday intii uu fasaxayga ama oggolaanshahaygu shaqeynayo wuu sii shaqeyn doonaa (lama beddeli karo).

Saxeexa hoosta, waxaan oggolahay inaan bixiyo ufasixidayda iyo oggolaanshahayga sida kor lagu sharaxay:

Qor Magaca Loo-adeegaha

TAARIIKHDA DHALASHADA

Saxeexa Loo-adeegaha

Taariikhda

Haddii waalida/wakiil uu saxeexo iyagoo wakiil ka ah loo-adeegaha, fadlan dhammaystir macluumaadka soo socda:

Qor Magaca Waalidka (haynta leh ama aan haynta lahayn) ama Ilaaliyaha

Saxeexa Waalidka (haynta leh ama aan haynta lahayn) ama Ilaaliyaha

Taariikhda